

Xogta REALD iyo Su'aalaha Naafanimada

Waa maxay REALD?

REALD waxay u taagan tahay noocyo macluumaad oo la ururiyo; oo ay ku jiraan:

- Asalka
- Qowmiyadda
- Luqadda, iyo
- Naafanimada,

Sharci ahaan ([Sharci La Soo Jeediyay ee 2134](#)), Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA) iyo Waaxda Adeegyada Dadweynaha ee Oregon (ODHS) waa in ay ururiyaan xogta REALD. Waxaa looga baahan in ay sidaasi sameeyaan markasta oo ay ururiyaan, keydiyaan ama soo sheegaan xogta kale ee qaab-dhismeedka dadka, sida jinsiga, da'da iyo dakhliga. OHA and ODHS ayaa la shaqeeyay Xuquuqda Naafada Oregon iyo dadka u dooda kale ee naafanimada si loo dejiyo su'aalaha naafanimada REALD ee 2013 iyo 2014 intii lagu guda jiray nidaamkii guddiga tala-bixinta ee sameynta xeerka. Guddiga tala-bixinta ee sameynta xeerka, oo ay weheliyaan dadka u dooda naafanimada, ayaa dib u eegis ku sameeyay oo cusbooneysiisay su'aalaha sanadkii 2020.

Sababta aan wax uga weydiino naafanimada

Waan ognahay in dadku yeelan karaan kala duwanaansho laga hortagi karo oo ah dhanka caafimaadka naafanimada awgeed. Marka aan u ururino xogta naafanimada si la mid ah xogta kale ee qaab-dhismeedka dadka, waxaan:

- Si wanaagsan u fahmi karnaa kala duwanaanshaha dadka ku nool Oregon, oo
- Si wanaagsan wax uga qaban karnaa sinnaan la'aanta.

Halkani waxaa ku qoran daraasadaha qaarkood oo loo isticmaalay xogta REALD si la iskugu wargeliyo isticmaadaha caafimaadka ee loogu talagalay dadka qaba naafanimada:

- [Journal of Adolescent Health](#), Ogoosto 2021: Daraasadani waxaa loo isticmaalay xogta REALD oo ka socota Ra'yi ururintii OHA ee 2015 iyo 2017 ee Dhallinyaro Caafimaad qabta ee Oregon. Natiijooyinkani ma taageerayaan khuraafaadka ah in ardayda naafada ahi aysan galmo ahaan firfircoonayn waxayna tilmaamayaan baahida loo qabo:
 - » Ka hortagga xadgudubka galmada
 - » Dhiirigelinta caafimaadka galmada, iyo
 - » Dadaalada yareynta khatarta. [Halkan ka fiiri wixii macluumaad dheeraad ah.](#)
- [Guudmarka CD](#), Oktoobar 2017: Xogta REALD oo ka socota Ra'yi ururintii OHA ee 2015 ee Dhallinyaro Caafimaad qabta ee Oregon ayaa ku wargelisay daraasadani. Daraasada waxaa lagu ogaaday kala duwanaansho weyn oo la xiriira:
 - » Xadgudubta
 - » Xoog isku muquunin ka jirta dugsiga
 - » Halista uurku leeyahay iyo STD-yada
 - » Baahiyaha daryeelka caafimaad ee aan la buuxin, iyo
 - » Adkeysiga iyo taageerada dugsiga.

Si aan u weydiino su'aalaha

Naafanimadu “Disability” waa magaca weydiimaha. Si kastaba ha ahaatee, su'aalaha naafanimadu waxay wax ka weydiinayaan dhibaatooyinka dhanka wax qabashada “functional difficulties.” Sababta tani waxaa u sabab ah, xataa haddii dadku aysan isku aqoonsanayn in ay yihiin naafo, waxay la kulmi karaan dhibaatooyinka dhanka wax qabashada ah “functional difficulties”: oo

- Caqabad ku ah helitaankooda daryeelka caafimaad
- Isbeddela waqti ka dib, isla markaana
- Kala duwan dhanka darnaanshaha ku saleysan da'da.

Su'aalaha intooda badani waxay ku saleysan yihiin [heerarka ururinta xogta naafanimada ee federaalka](#). Su'aalahaasi waxay soo mareen dhowr wareeg oo ah imtixaanka/baaritaanka dhanka garashada iyo goobta. Su'aalaha qaarkood waa in ay ku jiraan dhammaan ra'iyi ururinta ay damaanad qaaday Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Dadweynaha (HHS) ee federaalka. Su'aalahani ayaa diiradda saaraya sida dhibaatooyinka dhanka wax qabashada “functional difficulties” saameynta ugu yeeshaan in si buuxda looga qayb qaato bulshada.

Sidee baan u ilaalinaya waxyaabaha kuu gaarka ah?

Waxaanu rabnaa in qof kastaa ka jawaabo su'aalaha REALD si uu badbaado u dareemo. Waxaan jawaabahaaga ula dhaqanaa in ay yihiin diiwaanka caafimaadka dadweynaha oo qarsoodi ah.

Adiga ayaa go'aan ka gaari kara

Adiga ayay kugu xiran tahay haddii aad ka jawaabto su'aalaha REALD. Su'aalaha aadan rabin in aad ka jawaabto, waxaad dooran kartaa “Ma rabo in aan ka Jawaabo.” Si kastaba ha ahaatee, waxaanu rajeynaynaa in aad ka jawaabi doonto su'aalaha oo dhan. Waxaanu jeclaan lahayn in aanu xogta u adeegsano in ay naga caawiso ogaanshaha iyo wax ka qabashada sinnaan la'aanta dadka qaba naafanimada.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Sinnaanshaha iyo Ka mid noqoshada kala xiriir 1-844-882-7889 ama email u dir OHAREALD.Questions@dhsosha.state.or.us. Waa aqbalnaa wicitaanada gudbinta oo dhan ama waxaad wici kartaa 711.

